

OGAYSIIS KAHORTAGA TAKOORKA

Bellin Health iyo kuwa la shaqeeyaa waxay u hoggaansamaan shuruucda xuquuqda madaniga ah ee federaalka cidnana kuma takooraan ku salaysan isir, midab, asal qaran, da', naafo, ama jinsi (oo waafaqsan baaxadda takoorka jinsiga ee lagu sharraxay 45 CFR 92.101(a)(a)(2)), ama saldhig kasta oo kale oo uu ilaalinayo federaalka, gobolka ama sharciga deegaanka. Bellin Health kama saarayso dadka ama ulama dhaqmo si ka yar sababtoo ah jinsiyad, midab, asal qaran, da', naafo, ama jinsi, ama saldhig kasta oo kale oo uu ilaaliyo sharciga federaalka, gobolka, ama deegaanka.

Bellin Health:

- Waxay siisaa dadka naafada ah isbeddel macquul ah iyo kaalmo iyo adeegyo gargaar ku habboon oo bilaash ah si ay si hufan noola xiriiraan, sida:
 - Turjumaanada Luuqada Dhagoolayaasha ee Xirfadleyda ah
 - Xog qoraal ah oo u qoran qaab kale (war waawayn, maqal, qaab elektarooniga ah oo la adeegsan karo, qaabab kale)
- Waxay siisaa adeegyo luuqaad oo bilaash ah dadka luuqadooda koobaad aysan ahayn Ingiriiska, sida:
 - Turjumaano xirfadley ah
 - Xog lagu qoray luuqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadan, nagala soo xidhiidh: (920) 445-7373

Si aad u gudbiso Cabasho:

Haddii aad aaminsantahay in Bellin Health ama kuwa la shaqeeyaa ay ku guuldaraysteen inay bixiyaan adeegyadan ama ay kugu takooraan si kasta oo kale oo ku salaysan isir, midab, asal qaran, da', naafo, ama jinsi, waxaad u gudbin kartaa cabashadada:

Beth Golonka, Iskuduwaha Xuquuqda
Madaniga/Takoorka La'aanta

744 S Webster Avenue, Green Bay, WI 54305-3400

Lambarka Taleefoonka: (920) 430-4731

beth.golonka@bellin.org

Waxaad cabashada ku xaraysan kartaa qof ahaan ama boostada, telifoonka, ama iimaylka. Haddii aad u baahan tahay caawimo xeraynta cabashada, Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga/Xuquuqda La'aanta ayaa diyaar u ah inuu ku caawiyo. Bellin Health kama aargoosato qof kasta oo soo gudbiya cabasho, ka qaybqaata baadhista cabashada, ama ka soo horjeeda takoorka.

Waxaad sidoo kale u gudbin kartaa ashtako xuquuqda madaniga Mareykanka. Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah. Cabashooyinka waxaa lagu xerayn karaa si elektaroonig ah iyada oo loo marayo Xariirka Cabashada Xuquuqda Madaniga ah, oo laga heli karo:

<https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf> ama iimaylka ama telifoonka oo ah:

Waaxda Adeegyada Dadwaynaha iyo Caafimaadka
Mareykanka

200 Independence Avenue, SW Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201

1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)

OCRComplaint@hhs.gov

Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa at

<https://www.hhs.gov/ocr/complaints/index.html>

Ogeysiiskan waxaa laga heli karaa mareegahayaga:

www.bellin.org.